



Abaalmarinada & Isa sharfidda: Ardayada ACCESS oo heshay deeq waxbarasho

Ardayada fasalka siddeedaad ee dhigata Machadka ACCESS Soren Cowell-Shah ayaa la siiyay abaalmarin sharaf leh, oo ah deeq waxbarasho oo qaran ahaan lagu tartamo oo laga helo Machadka Horumarka Waxbarashada. Soren waxay ka mid ahayd 30 arday oo ka kala socotay waddanka oo la siiyay Deeqda waxbarasho ee Caroline D. Bradley, oo ah abaalmarin ku saleysan dhanka mudnaanta oo bixiya kharashka dhigashada dugsiga sare oo afar sano ah.

Deeqda waxbarasho waxay furaysaa fursad loogu talagalay in ardaydu ay dhigtaan "barnaamijka dugsiga sare oo si wanaagsan la isku barbardhigay oo loogu talagalay in lagu buuxiyo baahiyaha dhanka garashada iyo qof ahaaneed, iyo sidoo kale helitaanka taageero shakhsiyeed, u doodis dhanka waxbarashada ah, iyo nidaamka ardayda oo isku mid ah," sida laga soo xigtay [website-ka barnaamijka](#).

Deeqda waxbarasho waxay dadka ku guuleysta u oggolaan doontaa in ay dhigtaan dugsiga sare ama barnaamij waxbarasho oo beddel ah oo waddanka ka jira oo ku habboon baahiyihiisa ama baahyaheeda iyo hadafkiisa ama hadafkeeda "dhanka garashada qof ahaaneed, tacliimeed iyo shakhsi ahaaneed." Dadka aqoonta lihi waxay sidoo kale heli doonaan la talin dhanka waxbarashada ah si ay iyaga u taageeraan inta ay ku jiraan xirfadahooda dugsiga sare iyo inta ay ku jiraan nidaamka codsiga kulliyadda.

Sida laga soo xigtay IEA, boqolaal arday ayaa codsaday, iyada oo saddex guddi goboleed oo dhanka xulashada ah ay goobta ku soo koobeen 58 oo isku soo haray, oo la kulmay xubnaha guddiga ee deeqda waxbarasho .

[Soren waxaa lagu soo bandhigay qayb dhawwaan ka baxday KATU.](#)

Lim oo ka tirsan Barnaamijka Macluumaadka Tiknoolajiyada 'IT' ayaa loo oggolaaday barnaamijka Google: Melissa Lim, oo ah la taliye dhanka tababarka ah oo ka tirsan waaxda Macluumaadka Tiknoolajiyada ee PPS, ayaa loo oggolaaday Barnaamijka Qofka wax hindisa ee La aqoonsan yahay ee Google, kaasi oo Lim ka caawin doona in ay bilowdo mashruuc si ay macallimiinta midabyada kala duwan uga dhigto in ay jeclaadaan tiknoolajiyada dhanka waxbarashada.

Lim waxay ku biiri doontaa barnaamij qayb ka ah Google oo loogu talagalay Waxbarashada isla markaana ay ku lug leeyihiin in ka badan 1,500 macallimiin iyo in ka badan 50 dal. Codsigeedii, Lim waxay ku aqoonsatay hadaf lagu wanaajinayo sinnaanshaha dhanka waxbarashada. In ka badan 12 bilood, Lim waxay ka qayb qaadan doontaa shaqada horumarinta shakhsi ahaaneed taasi oo ka caawin doonta iyada in ay dhisto mashruuceeda.

Lim waxay horseed ka ahayd dadaalka degmada oo dhan si u fududayso kaydinta dokumentiyada iyo wax wadaagida iyada oo la adeegsanayo qalabka ku saleysan Google.